Sumad: SF/CLC/08/04/PR3 Taariikh: 01/09/04

**WAR SAXAAFADEED:**

**WAXA AANU KA CODSANEYNA BAALAMAAMKA IN AY KALFADHIGOODAN ANSIXIYAAN XEER TIRTIRAYA AWOODAHA GARSOORKA EE GUDIYADDA NABADGELYADA**

Ururka Somaliland Forum ayaa u gudbiyey Golaha Wakiilada, iyo Golaha Guurtida codsi iyo nuqul Mashruuc Sharci (Bill) oo ku saabsan baab'inta awoodaha garsoorka ee Gudiyadda Nabadgelyada ee Somaliland.

Ururku wuxuu bishii Juun horaanteedii ugu diray si gaar ah Madaxweynaha iyo Dawladda Somaliland qoraal dheer oo uu ku caddeeyeeyay in hawlaha garsoorka ee Guddiyada Nabadgelyadu:

- ay yihiin qaar ka soo horjeeda Distuurka JSL;
- kuna xadgudbaya sharciyada caalamiga ee xuquuda aadamiga; oo
- si cad u dhaafsiisan go'aankii 1999kii ay Golaha Wakiiladu ku laaleen ku dhaqanka Xeerkii 1963kii oo Gudiyaddani mararaka qaarkood cuskadeen inkastoo Xeerkaaasi aanu asal ahaanba siinaayay awoodaha noocan oo kale ah Maxkamadda oo kaliyia. Waxa u Xeerkaasi dhigaya xitaa marka xaalad deg deg ahi (state of emergency) oo Baarlamaanku cadeeyey ay jirto, in xidhista qof markiiba la ogeysiiyo maxkamad.
- Waxaa intaa dheer in Somaliland wax allaale wax xukun deg deg ah oo Baarlamaanku ansixiyey, oo aan ka ahayn xaaladii Sool, aanay jirin mudaba. Taasi oo ina tusaysa in xeerar aan ahaayn kuwii keligii taliskii oo u ogol Gudiyadan in ay cid xidhaan aanay jirin, Xeerarkaasna Qododobka 128aad ee Distuurka ayaa ka dhigay wax kama jiraan.

Mar haddii Dawladu aanay Gudiyadan baab'ineyn, waxaannu soo jeedineynaa:

- In Golaha Wakiilladu iyo Golaha Guurtidu ay kalfadhigan ajandahooda ku daraan dooda iyo ansixinta Xeerka Burburinta Awoodaha Garsoorka ee Gudiyadda Nabadgalayaa or nuqulkiisa aanu halkan kusoo lifaaqnay .
- Golohu Wakiiladu waa kii horey u soo saaray Go'aan ku saabasan Gudiyaddan, laakin sida keliya ee lagu baabi'in karaa Gudiyaddan waa soo saarida Xeer.
- Haddii, marka labadda Golaba ay ansixaan Xeerkan, Madaxeynuhu ka gaabsado in uu saxeexo, waxaanu ku gubaabineyna Golaha Wakiildda in ay Xeerkan ku saaraan habka ku xusan Qodobada 77 iyo 78aad ee Distuurka.

Golyaasha waxa aanu kaloo ka codsaneyna in hirgeliyaan labadan talo oo aanu u soo jeediney Madaxweyne oo ah:

- in cid aan ahayn bileyska, xeer ilaalinta iyo maxkamdaha mooye, cid kale aanay qofna xorriyadiisa ka qaadin; iyo
- in si dhakhso ah loo sameeyo <u>Kommishanka Xuquukda Aadimga ah ee Somaliland</u> oo ay xubnahooda magacaabaan Golaha Wakiiladdo.

Waa billaahi towfiiq.

*(Waxa aanu halkan ku lifaaqnay Codsigii Ururku u diray Golayaasha iyo nuqulkii Mashruuca Xeerka Burburinta Awoodaha Garsoorka ee Gudiyadda Nabadgalyadda)*

**Ururka Somaliland Forum**

---

***"Ururka Somaliland Forum waa urur madaxbannaan oo ay isku bahaysteen qurb-joog reer Somaliland ahi. Waxa uu ururkani aaminsanyahay qarannimada, horumarka iyo madaxbannaanida Somaliland waxanu iskaashi la sameeyaa jaalliyadaha Somaliland ee dalka dibaddiisa ku dhaqan iyo waliba ciddii kale ee danaysa horumarka Somaliland. Ururkani wuxu rumaysanyahay in dadka reer Somaliland ee dibaduhu ay door ka ciyaari karaan horumarinta dalkooda."***

**Wixii faahfaahin dheeraada kala soo xidhiidh urur Guddoomiyaha:**

Gudoomiye, Deeqa G Xidig, chair@somalilandforum.com
Guddoomiye-xigeenka, C/llaahi Cawed vice@somalilandforum.com
Xoghayaha, Khadar Xasan Cali secretary@somalilandforum.com ,
Khasnajiga, Axmed Saleebaan treasurer@somalilandforum.com iyo
Xubin -Guud, Cumar Cabdi Nuux xubin@somalilandforum.com

---

**Taariikh: 25 Ogosto 2004**

**Ku: SHIR GUDDOONKA IYO XUBNAHA GOLAHA WAKIILADDA**
**SHIR GUDDOONKA IYO XUBNAHA GOLAHA GUURTIDA**
**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Hargeisa, Somaliland**

**Og: Warfaafinata**
**Hargeisa, Somaliland**

Mudanayaal ,

**Uj: <u>Codsi Ku Saabsan Tirtiradda Guddiyada Nabadgalyada</u>**

Salaanta Islaamka ka dib, waxaanu halkan idiinku soo lifaaqnay talooyin ku saabsan Gudiyadda Nabadgalyadda oo aanu u dirnay Madaweynaha JS bishii Juun horaanteedii. Nasiib daro, ilaa hadda, wax jawaab ah ka maanaan helin.

Sida aad ku arkeysaan taladan, waxaanu kaloo soo jeedinay in haddii Dawladdu aanay rabin in ay joojiso shaqadda qayr al distuurka ah ee ay qabtaan Gudiyadda Nabdagalyadu, in aydun Baarlamaan ahaan idinku soo saarataan Xeer gaaban oo baabi'naya awoodaha grasoorka ee Gudiyaddaas.

Golaha Wakiiladu mar hore ayay arintan go'aan ka gaadheen (tixraac Go'aanka GW/KF-08/99/99 ee 01/08/99). Hase yeeshe, mar haddii go'aankaas aan Dawladdu hirgalin, waxaanu ka codsaneynaa labadda Goleba:

- In ay Kalfadigoodan hadda bilaamay ay ajendaha arrintan ku darsadaan;
- In ay Xeer kooban oo tirtiraya awooda grasoorka ee Gudiyadda Nabdagalyadda ay ka doodaan, oo ansixiyaan.
- In Marka labadda Gole Xeerkan u gudbiyaan Madaxweynaha, haddii aanu Madaxweynuhu Xeerkan ku saxeexin mudada ku cayiman Distuurka in Golaha Wakiiladu ay Xeerkan ku socodsiiyaan habka ku qoran Qodobka 70aad ee Distuurka.

Waxaanu halkan kusoo lifaaqnay nuqul **Masruuca Xeerka Burburinta Awoodaha Garsoorka ee Gudiyadda Nabadgalyadda**, waxaanan Mudnayaasha GOLAHA WAKIILADDA ka codsaneynaa in sida ku cad Qodobka 74(2) iyo Xeer hoosaaka Golaha ay soo jeediyaan Xeerkan cusub mudanayaal badani, Goluhuna ay si deg deg ah u ansixiyaan, una gudbiyaan Golaha Guurtida, oo iyana aanu ka rajeynayno inay xilkaas ka soo baxaan.

Daraasad dheer yaanu ku sameyney Arrintan awoodahan Gudiyadda Nabadgalyadda, waana ay noo caddahay in arrintan saldhigeedu aanu ahayn Xeerkii Xasilloonidda Guud (Xeer No: 21 ee 26/08/1963) oo aan marna ogaleyn in cid aan Maxkamad ahayni ay qof xoriyadiisa ka qaado, laakin arrintani ay ku saleysantahay dikriitooyinka xuluumaddii keli-taliskii Afweyne.

Waxa annu Somaliland u rajaynaynaa guul iyo horumar.

Wasalaama calaykum,

*Ibrahim Hashi Jama*

Ibraahim Xaashi Jaamac
**Gudoomiyaha Gudiga Distoorka iyo Sharciyadda**
**Ururka Somaliland Forum**

---

## (MASHRUUC) XEERKA BURRINTA GUDIYADDA NABADGELYADDA

**Golaha Wakiiladda JSL**

Markuu Tixgaliyey: Go'aankiisii hore ee ku burriyey Xeerka Xeerka Nabadgelayadda Guud (Public Order Law, No. 21) ee soo baxay 1963kii, soona saaray 1dii Ogosto ee 1999kii, arkeyna in aany Dawladdu fulin go'aankaas oo weli cuskato Xeerkaas 1963 iyo bedelladihii lagu sameeyey Xeerkaas mudaddii keligi taliyihii;

Marku ku Qancay: In awoodaha Gudiyadda nabadgelyadu ay ku xadgub tahay Distuurka JSL iyo Xeeraka caalimga ah ee xuquuqda aadamiga ah;

Marku u sii Fiirsaday: Distuurka JSL oo kala xadeeya awoodaha waaxyaha xeerdejinta, xukuumadda iyo garsoorka;

Marku si gar ahh u Eegay: Qaybta 1 aad, Xubinta 3aad oo Distuurka JSL oo cadeynasa xuuqda qofka iyo xoriyadah aasaasiga ah;

Marku u ku Qancay: In Xeerakii hore ee Gudiyadda Nabadgelyada siiyay awoodo ay dadka amran in la qabto, amaba ay xadhig iyo ciqab kusoo saaraan in ay tahay mid ku lid ah Distuurka JSL oo noqoneysa waxba kam-jiraan sida ku xusan Qodobka 128aad, faqradiisa 2aad;

Markuu ku Qancay: In aanay dalka ka jirin Nabadgelyo darro gaadhsiisan xaalad xukun deg-deg ah. Allah mahadi ha ka gaadhee, haddi xaalado deg deg ah yimaadaan, nidaamka ku xusan Qodobka 92aad ee Distuurka JSL lagaga hortigi karo;

Markuu Aqoonsaday: In Hay'addahii sharci fulintu ( Booliska, Xeer-ilaalinta, Garsoorka iyo Asluubtu) ay dhisan yihiin;

**Wuxu soo saaray Xeerkan:**

**Qodobka 1aad: Tirtiradda Gudiyadda Nabadgelyadda**

Dhamaan Gudiyadda Nabdagelyadda ee heer kasta ah (qaran, gobol, iyo degmoba) waa la baabi'yey. Dhamaan wax allaale wixii go'aan, amar, ama xukun ay soosaareen ee ku lid ah xorriyaddaha Qofka ee ku xusan Distuurka JSL waxay noqayaan wax kama jiraan.

**Qodobka 2aad: Siideynta Maxaabiista**

Qof kasta oo u xidhan amar ama xukun ay soo sareen Gudiyadda Nabadgelyadu waxa la sii deynaya maalinta uu Xeerkani dhaqan galo.

**Qodobka 3aad: Koobinta Xeerkan**

Si aan shaki u galin, Xeerkani ma saameynayo Gudiyadda ama shirarka joogtada ah amaba mid midka ah ee xildhibanadda qaybaha Dawladda Dhexe iyo

Dawladda Hoose ay isugu yimaadan ama qabtaan ee lagaga xaajoonaya arrima kala duwan ee ay ka mid yihiin nabadgelyado. Hase yeeshe, ma jiri karto cid ka baxsan booliska, xeer-ilaalinta iyo Garsooka oo amri karta in qof xorriyadiisa laga qaado.

**Qodobka 4aad: Ciqaabta ku Xadgudubka Xuqquuqda Xorriyadda Qofka**

Iyadoo waxba aan laga bedelleyn Qodobodda 460, 461 iyo 462 ee Xeerka Ciqaabta kuna saabsan denbiyadda laga galo xooriyadda qofka, ciqaabta laga mutaysan karo jebinta faqradda 1aad ilaa 7aad ee Qodobka 27aad ee Distuurka JSL kuna saaban xuquuqda qofka xorriyadda laga qaaday, ee ku xusan faqaradda 9aad ee Qodobkaas, iyo ku xadgudubka Xeerkani waa xadhig ila sadex (3) sanno ah.

**Qodobka 5aad: Dhaqan Gelid**

Xeerkani wuxu dhaqan gelayaa maalinta uu saxeexo Madaxweynaha JDS ama maalinta Golha Wakiiladu kusoo saaraan sida habka ku xusan Qodobadda 77 iyo 78 ee Distuurka JSL

Allaa Mahad leh

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladda

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda